

UJEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **19/02/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Tajjir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- SAIDA SHEIKH ABDULLE ALI, Hooyo Xaliima Cumar Maxamed, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 06-09-1973, Sita: Somali Passport, Lr. P00843404

LA WAKIISHE:- ABDULLAHI ALI HASSAN, Ina Fadumo Cabdulle Axmed, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 12-12-1964, Degan Cabdi Casiis, Sita: Somali Passport, Lr. P01158118

TILMAAMAHA NUS BOOSKA

Nus Boos Banaan oo Ku yaal: **Muqdisho**, Degmada: **(Yaaqshiid)**, Cabirka: **(20X7.5-Mt)-M**, Looto No: **1274-P3 (ahna nuska xiga laamiga)**, W.M.L: **(Rep.79566/MPN/2021)**, Tr. **14/10/2021**, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Una Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble

SOOHDINTA NUS BOOSKA

Bari: dhul dad, Koonfur: **Jid**, Galbeed: dhul dad, Waqooyi: dhul dad

B- Aniga oo ah **SAIDA SHEIKH ABDULLE ALI**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **ABDULLAHI ALI HASSAN** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Nus Booska Tilmaamihisu Sare Ku Xusan yihiin, in Nus Booskaas uu gadi karo, Wareejin karo, Hibeyn karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **ABDULLAHI ALI HASSAN** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Nus Booskaas aan soo sheegay ka macaamilidiisa wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **ABDULLAHI ALI HASSAN**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada ay isiiyey **SAIDA SHEIKH ABDULLE ALI**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXISADA

SAIDA SHEIKH ABDULLE ALI

1- SAYIDALI ABDULKADIR AHMED

(Signature)

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

ABDULLAHI ALI HASSAN

2- MOHAMED BILLE DAGANE

(Signature)

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1417/T.P.N/25, Tr. 19/02/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- SAIDA SHEIKH ABDULLE ALI** Ahna (Wakaalad Bixiye), **2- ABDULLAHI ALI HASSAN** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.



NOOTAAYAHA
Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

NOLOSTO NO: 110650

UJEEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANAAN OO MUNICIPALLE AH.

Muqdisho: Maanta oo ay taariikhdu tahay **14/10/2021**, anigoo ah **Dr. Saciid Cali Cosoble**, ahna Nootaayaha Muqdisho, xafiisna ku leh inta u dhaxaysa Masjidka Abuhurayra iyo Shirkadda Dahabshiil ee Suuqa Bakaaraha ee Magaalada Muqdisho, waxaa xafiiska iigu yimid ayagoo heshiis ah, mudanayaasha hoos ku xusan:

ISKA IIBIYE: Xasan Maxamuud Axmed Maxamuud, Hooyo: Aasiyo Cali Mahdi, Somali ah, Ku Dhashay: Cadale, Sanadkii: 1969, Degan Muqdisho, Leh: Somali Passport, Lr. P007216604.	IIBSATO: Saida Sheikh Abdulle Ali, Hooyo: Xaliimo Cumar Maxamed, Somali ah, Ku Dhalatay: Muqdisho, Sanadkii: 1973, Degan Muqdisho, Leh: Somali Passport, Lr. P00843404.
WARBIXINTA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO Dhulkaan oo ku yaal: Muqdisho , Degmada: Yaaqshiid , Cabirka: (20X30)-M , Looto No: 1272-1274-P3 , W.M.L: 28946/21, Tr. 20/06/2021, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Dr. Daahir Xaaji Xasan Axmad.	SOOHDINTA DHULKA Bari: Dhul dad, Koonfur: Jid , Galbeed: Dhul dad, Waqooyi: Dhul dad QIIMAHA DHULKA: USD \$65,000 (Lixdan Iyo Shan Kun Oo Doolarka Mareykanka ah).
ASALKII HORE EE DHULKA: Magaca: Faadumo Cali Mahdi, Cabirka: (40X60)-M Looto No: 1267 ilaa 1274-P3 , Rasiid No. 121417, Tr. 19/01/2015, Sabarlog No: 22/17/2015, Tr. 20/01/2015, Kana Soo Wada Baxeen Dawladda Hoose Muqdisho.	

Hadaba qoraalka sare iyo kan soo socda oo wada xariira ayaa dhinacyada heshiiska waxay caddeynayaan sidatan:

ISKA IIBIYE: Aniga oo ah Xasan Maxamuud Axmed Maxamuud, waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskaxda iyo caqligaba kafiyoow in aan ka gaday kuna wareejiyey Saida Sheikh Abdulle Ali dhulkayga banaan oo tilmaamihisu sare ku xusan yihiin, waxaan kale oo aan cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskaan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee la xiriira isla dhulkaan, waxaan kaloo caddaynayaa in aan qaatay dhammaan lacagta sare ku xusan, wixii taariikhda sare ka danbeeyana dhulkaan milkiyadiisa, faa'iidadiisa iyo bixinta canshuureedba wuxuu u wareegay iibsato Saida Sheikh Abdulle Ali.

IIBSATO: Aniga oo ah Saida Sheikh Abdulle Ali, waxaan dhankayga heshiiskan ku caddaynayaa in Xasan Maxamuud Axmed Maxamuud uu iga iibiyay iguna wareejiyay dhulkaan lehna sifaha uu ku soo xusay isla markaana aan ka gudoomay kuna qancay heshiiskaan.

MARKHAATIYAASHA: Anaga oo kala ah 1-Maxamed Cali Fiidow, 2-Xasan Axmed Maxamed (Ciribee), waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa in aan markhaati iyo goob joogba ka nahay beeca dhulka sare ku xusan.

SAXIIXA ISKA IIBIYAHA DHULKA

XASAN MAXAMUUD AXMED MAXAMUUD

SAXIIXA IIBSATADA DHULKA

SAIDA SHEIKH ABDULLE ALI

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- MAXAMED CALI FIIDOW

Rep. 79566/MPN/2021

(CADDEYNTA NOOTAAYAHA)

XASAN AXMED MAXAMED (CIRIBEEY)

Tr. 14/10/2021

Anigoo ah Nootaayaha Muqdisho, **Dr. Saciid Cali Cosoble**, waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa 1- Xasan Maxamuud Axmed Maxamuud (ahna iibsatada dhulka), iyo waliba Labada Nin ee Soomaaliyeed oo dhankayga ka qayb qaatay, waxay ka caawiyey oo kor ku xusan, Dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay neshiiskaan igula saxiixeen Xafiiska iyaga oo xis qaba raalinta ah, Caafimaad qaba, Xiskooduna taam yahay, Cid khasbeysana aysan jirin, Waana Beec ansax ah oo Waafaga Soomaaliga Cada Islaamka.

By: Baniin



NOOTAAYAHA
DR. SACIID CALI COSOBLE

17/10/2021 Waa laadii Waan
Idi'iyey waana
Geo Maxamed
Waa laadii Waan



FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 01/03/2025

Aniga oo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/LLAAHI CALI XASAN** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1417/T.P.N/25, Tr. 19/02/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	C/LLAAHI CALI XASAN
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	20X7.5-Mt
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Yaaqshiid
Lotto Lambar	1274-P3 (ahna nuska xiga laamiga)
W.M.L	Rep.79566/MPN/2021, Tr. 14/10/2021 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho
Taariikhda Wakaalada	19/02/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **C/LLAAHI CALI XASAN**, Leh Tel No. **0618000233**, Degan **C/casiis** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.

*FG. wakaalada waxaan usoo jirayay
Xafiiska Nootaayo Muqdisho Tawjiib
halkas ayaa dhukn lasoo wareejisay*



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Dr. Maxamed C/laahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/LLAAHI CALI XASAN